

Shuruudaha Tallaalka ee Dugsiga Maine

Dhammaan carruurta ka diiwaangashan dugsiyada dadweynaha ama kuwa gaarka ah ee Maine waa inay qaataan tallaalkada soo socda.

Looga baahan yahay **bilaabidda Fasalka Barbaarinta:**

- 5 DTaP (4 DTaP haddii 4aad la bixiyo maalinta dhalashada da'da 4aad ama kadib)
- 4 Dabaysha (3 Dabaysha haddii 3aad la bixiyo maalinta dhalashada da'da 4aad ama kadib)
- 2 MMR (Jadeecada, Qaamo qashiirka, Jadeeca Jarmalka)
- 2 Varicella (Busbus)

Looga baahan yahay **bilaabidda PreK:**

- 4 DTaP
- 3 Dabaysha
- 1 MMR
- 1 Varicella (Busbus)

Looga baahan yahay **bilaabidda fasalka 7aad:**

- Dhammaan tallaalkada horay loogu baahnaa
- 1 Tdap
- 1 Tallaalka Meningococcal Conjugate (MCV4)

Looga baahan yahay **bilaabidda fasalka 12aad:**

- Dhammaan tallaalkada horay loogu baahnaa
- 2 MCV4 (hal qiyaas oo keliya ayaa loo baahan yahay haddii qiyaasta 1aad la bixiyo maalinta dhalashada da'da 16aad ama kadib)

AMA

- Ka-dhaafitaanka caafimaad ee hal ama dhammaan tallaalkada
- Caddaynta shaybaadhka ee ka hortagga cudurro gaar ah ama taariikh la isku halayn karo ee diiwaanka cudurka ah oo uu qoray dhakhtar ama bixiye kale ee daryeelka aasaasiga ah
- Ka dhaafida falsafeed ama diimeed waxa kaliya loo ogol yahay ardayda IEP-ga oo ka-dhaafitaanku u jirtay ka hor Sebtembar 1, 2021

Diiwaangelin kasta oo tallaalka ah waa in ay ki jirtaa nooca tallaalka, taariikhda la bixiyay iyo magaca bixiyaha. Laga bilaabo Sebtembar 1, 2021 kaliya ka-dhaafitaannada caafimaadka ayaa la ogg rka laga reebo sida lagu sifeeyay [Sharciga 20-A §6355](#)



Wixii macluumaad dheeraad ah
Waaxda Waxbarashada Maine
Iimayl: DOESchoolandStudentSupports@maine.gov
[Tallaalkada | Waaxda Waxbarashada \(maine.gov\)](#)

